



PORLAND
PUBLIC
SCHOOLS

Dib-u-eegista Siyaasada Habdhaqanka iyo Anshaxaa Ardayga



Siyaasadayaada ayaa
cusbooneysiin lagu
sameynayaa si ay u
dhiirigeliso dhaqanada
ka warqabida
jaah-wareerka iyo soo
celinta fayo-qabka.

Hanaanada anshaxaa waa in loo isticmaalaa inay
ardayda ka taageeraan barashada xirfadaha iyo
fikradaha loo baahan yahay si loo kobciyo jawi dugsi
oo fiican loogana fogaado dhaqanada xun.

PPS waxay raadineysaa inay meesha ka saarto
farqiga u dhexeeyaa hanaanada anshaxaa iyadoo la
xaqijinayo waxka qabadyo ay u wada siman yiin
dhammaan kooxaha jinsiyadaha iyo qowmiyadaha,
jinsiga, kuwa naafada ah, iyo kuwa kale ee la ilaaliyo.

Mabaa'diida Anshaxa ee Lasoo Jeediyay

- A. Anshaxu waa inuu ahaadaa mid dhexdexxaad ah, daah-furan, aan dib dhicin, caddaalad ah, koritaan ahaana habboon kuna saleysan baahida ardayga khaaska ah (ORS 339.250)
- B. Dhaqanada anshaxu waa inay dhiirigeliyaan ka hortaga oo ay adeegsadaan waxka qabadyada waxtarka leh kadib marka uu habdhaqanku dhaco, iyagoo raadinaya hagaajinta wixii waxyeelo ah ee ka dhashay.
- C. Dugsiyadayadu waxay sameyn doonaan dedaal kasta oo macquul ah si ay mudnaanta u siyaan waxka qabashada habdhaqanka ardayga iyada oo loo marayo qoyska, dugsiga, iyo ilaha ku saleysan bulshada, si fiicana uga warqaba jaah-wareerka. Tan waxa ku jira beddelada waxbarasho ee tallaabada anshaxa.
- D. Waa in la tixgeliyaa saameynta jaah-wareerka iyadoo ay himiladu tahay yareynta wakhtiga ka maqnaanshaha fasalka. Anshax marinta ka saarista [fasalku] waa tallaabada u dambeysa.

